Warbixinta Horumarka Laga Gaaray Mustaqbalka Adeegaada Koorantada

WARARKII UGU DAMBEYAY QORSHAHA ISTRAATIJIYADA SEATTLE CITY LIGHT 2017-2022



Wararkii ugu dambeyay Qorshaha Istraatijiyada Seattle City Light waxay muhiimad siiyaan horumarka aan gaarno si aan u hagaajino adeegga aan ku siino. Ujeedada danabka waa in laga kor maro waxa macaamilka ka fisho soo saarka iyo gaarsiinta quwad, deegaan ahaan, mas'uul ah, ammaan ah, la awoodo oo leysku halleyn karo.

Seattle City Light

THE NATION'S GREENEST UTILITY

Warbixinta Horumarka Qorshaha Istraatijiyada 2017-2022

HORUMARINTA UJEEDOOYINKA MUHIIMKA AH

Labo sanno kasta, City Light waxay casriyeysaa Qorshaheeda Istraatijiyada, halkaas oo baddalaadii ugu dambeysay la sameyay 2014. Casriyeyntaan xigta, lama baddalin aasaaska qorshaha si loo fulliyo heerarka adeegga iminka jira, isla markaasna la sii wado qorsheynta mustaqbal ku dhisan taxadi.

Qorshaha Istraatijiyada wuxuu ku habeysan yahay afar ujeedo oo muhiim u ah danabka iyo macaamiisheeda:

1. **Horumarinta waxa macaamilka kala kulmo iyo saadaalinta sicirka.**
2. **Kordhinta waxqabadka iyo ammaanka xoogga shaqaalaha**
3. **Xoojinta waxqabadka ururka**
4. **Sii wadidda hoggaaminta dhaqaaleynta iyo deegaanka**

Qorshaha Wuu Shaqeeyaa

Halkaan ka daawo tusaalooyin ku saabsan sida qorshaha u hagaajiyo adeegga macaamilka iyo hawlaha danabka ilaa 2008, waqtigaas aysan City Light qabin Qorshaha Istraatijiyada.

ADEEG KA SII WANAAGSAN

Macaamiisha City Light waxay la kulmeen in ka yar boqolkiiba 50 quwadda baxda. Taa kaddib, danabka wuxuu qiimeyn sare ka helay wareysiga macaamilka J.D. Power (Gobolka Galbeed).

Macaamiisha guryaha:
2008: Qiimeynta No. 11
2015: Qiimeynta No. 3

Macaamiisha ganacsiga:
2008: Lama qiimeynin
2015: Qiimeynta No. 2

AMMAANKA MARKA KOWAAD

City Light waxay daryeeshaa shaqaalaheeda iyo waxay ammaanka siisaa mudnaan sare.

Qadarka dhaawaca 2008: 6.9

Qadarka dhaawaca 2015: 6.0

WAA LA SOO CELIYAY QIIMEYNTA DEYNTA DANABKA

Macnaha qiimeynta heerka sare deynta waa in danabka si muuqata u yareyay kharashka uga baxa qaadashada deynta, taasoo ugu dambeyn saameysa biilasha macaamilka.

2008: Qiimeynta S&P, AA-

2015: Qiimeynta S&P, AA

DHAQAALEYNTA LACAGTA IYO QUWADDA

Dadaalka dhaqaaleynta waxay macaamiisha u dhaqaaleysaa lacag iyo waxay yareysaa baahida loo qabo in City Light soo saarto koronto badan.

2008: Waxaa la dhaqaaleeyay isku celceliska 10.1 megawatt
2015: Waxaa la dhaqaaleeyay isku celceliska 15.8 megawatt

QORSHAHA ISTRAATIJIYADA DHAQAALEYNTA-KHARASHKA

Taxadirka isticmaalka ilaha iyo hawlkarnimada waxay dhalliyeen isku filnaashada dhaqaaleynta kharashka danabka. Inkastoo hawlkarnimadaan jirto, City Light waxay dhaqaaleysay $18.5 malyan sannadkii 2015. Sannadkii 2018, danabka wuxuu isu xil saaray in uu dhaqaaleeyo $10 malyan dheeraad ah, iskudarka $28 malyan.

Ka Shaqeynta Qorshaha

HORUMARKA LAGA GAARAY ISTRAATIJIYADA MAAL GELINTA

City Light waxay fahamsan tahay in hagaajinta adeegga sii socoto xattaa inta warshadaha ku sugan yahiin in ay dhakhso isbaddalaan. Taasi waa sababta danabka horumar uga gaaro maal gelinta soo socota si ay u gaarto afarteeda ujeedo ee muhiimka ah.

1 HORUMARINTA WAXA MACAAMILKA LA KULMO IYO SAADAALINTA SICIRKA

Saldhigga Hoose Denny:

Waa saldhigga kowaad ay City Light dhistay muddo 30 sanno. Waxaa keentaa isku haleyn badan si loola kulmo baahida quwadda ku sii badata xaafado badan iyo waxay taakuleyn siisaa saldhigyo kale iyo shabakada gaarsinta gobolka. Dhamaystirka: 2018

Saldhigga Hoose Denny:

Cabbirka Horumarsan:

Maal gelintaan $94 malyan waxay isku toosisaa hawlaha City Light iyo waxay macaamiisha siisaa manaafaacaad kale, kana mid ah horumarinta gurmudka marka quwadda baxdo. Dhamaystirka: 2019

2 KORDHINTA WAXQABADKA XOOGGA SHAQADA IYO DHAQANKA AMMAANKA

Hiddaha Ammaanka:

Sannadkii 2015, dabacsanaanta ammaanka ku baahsan danabka oo idil ayaa ku dhiiri gelisay shaqaalaha in ay xoogga saaraan dareenka ammaanka. Sannadkii 2016, City Light waxay fullisay wareysi lagu guuleystay oo laga qaaday shaqaalaha kuna saabsanaa ammaanka, kaasoo ka dambeyay wareysi la fulliyay 2007. Muddo sanooyin yar kaddib, shaqaalaha waa la wareysan doonaa mar kale si loola socdo horumarka.

Shaqaale Xirfad Leh:

Si macaamiisha loo siiyo adeegga ugu fiican, City Light waxay maal gelisaa shaqaalaha, waxayna u adeegsataa siistemka tababarka internetka iyo tababarka hoggaaminta sii socda.

3 XOOJINTA WAXQABADKA URURKA

Bartilmaameedyada Waxqabadka:

Macaamiisha waxay rabaan in ay ogaadaan in danabka daryeelo ganacsiga, in uu si wanaagsan u isticmaalo waqtiga iyo lacagta. Si loo gaaro taas, danabka wuxuu dajiyay bartilmaameedyo si ay u caddaato la socoshada ujeedooyinkena loona arko haddii lala kulmo. Laga bilaabo 2013, waxaa la fulliyay ugu yaraan saddax daraasad oo laga sameyay bartilmaameedyada sannadka, waxaa la qorsheyay in kale oo badan mustaqbalka.

Talaabadaha Ammaanka-Internetka:

Ammaanka danabka waxaa suga barnaamij xooggan oo ku shaqeeyo internetka, kaasoo u hoggaansan heerarka sugidda ammaanka qaranka. City Light waxay kaloo sameysay habab keyd ah oo la adeegsado haddii lala kulmo musiibo fadhiisisa warshadahena aasaasiga.

4 SII WADIDDA KEYDINTA IYO HOGGAMMINTA DEEGAANKA

Cilmi Baarista Cimilada:

City Light waxay soo saartay Qorshaheeda La Qabsiga Cimilada (Climate Adaptation Plan) sannadkii 2016, kaasoo ku kaalmeyn doono danabka in uu la kulmo taxadi badan oo la xariira isbaddalka cimilada.

Cusboneysiinta Dhaqaaleynta:

City Light waxay ku shaqeysaa saddax dhismo xafiis oo ganacsi ah, waxayna halkaa ka soo saartay barnaamij cusub oo lagu magacaabo bixinta kharashka-waxa laguu qabtay. Waxay bixisaa dhiirigelinta maaliyadda, waxayna u adeegsataa lacag bixin ka timaada dhaqaaleynta quwadda, baddalkii la dhiiri gelin lahaa lacagaha halka mar la bixiyo, sida hiddaha ahaa. Sannadkii 2015, ka-qeybgaleyaasha waxay dhaqaaleysteen iskudarka ku dhawaad 3.5 malyan kilowatta saac, quwad ku filan in ay xoogga siiso 440 guryaha la daggo muddo hal sanno.

Horay Fiirinta

LA QABSIGA MUSTAQBALKA ISBADDALO

Warshadda korantada waxay ku sugan tahay isbaddal. Koriimada culeyska korantada Seattle waxay ku sugan tahay hakad, waxaana dhici karto in ay hoos u dhacdo muddada dheer, xattaa haddii dhaqaalaha kobco. Taas macnaheeda waxay tahay dakhli yar oo soo gala danabka, bacdamaa ay la kullanto kharash badan oo lagu baddalo qalabka duugga noqdo iyo adeegsiga farsamada cusub ay macaamiisha rabaan. Macnaha dhakhsaha isbaddalka farsamada waa in baabuurta ku shaqeeyso korontada, quwadda qoraxda iyo keydinta battariyada noqdaan kuwo si wanaagsan u shaqeeyo oo kharash yar. Xaqiiqada waxay tahay in ay dhici karto in macaamiisha aysan biri u baahanin adeegga danabka hiddaha sida ay maanta ugu baahan yahiin.

DANABKA MUSTAQBALKA

City Light waxay xil iska saartay in ay la qabsato. Sida qeyb ka tirsan casriyeynta Qorshaha Istraatijiayda, waxaan sahmin doonaa sida loo noqdo "Danabka Mustaqbalka" oo fudud, anaga oo horay u aqoonsanay in ay jiraan labo meel oo loo baahan yahay in danabka ka gaaro horumar: korantada gaadiidka iyo la qabsiga cimilada.

Korantada Gaadiidka:

Sannadkii la soo dhaafay, City Light waxay daraasad ku sameysay korantada qeybta gaadiidka Seattle iyo manaafacaadka ka dhasha in shidaalka lagu baddalo quwadda korantada nadiifka ah, khaas ahaan gaadiidka dadweynaha. Waxaan la shaqeynay waaxyada kale ee magaalada iyo Duqa Edward Murray si loo soo saaro qorshaha "Wad Nadaafadda Seattle" ("Drive Clean Seattle"), iyo waxaan sii wadnaa in aan maalgelino dadaalkaan.

Qorshaha La Qabsiga Cimilada:

Qorshaheenii Istraatijiyadii ugu dambeysay, waxaan daraasad ku sameynay sida isbaddalka cimilada u saameyso danabka iyo macaamiishena. Iminka waxaan daabacnay Qorshaha La Qabsiga Cimilada (Climate Adaptation Plan), taasoo danabka ku kaalmeeysay in uu isu diyaariyo iyo in uusan u nuglaanin isbaddalka cimilada.

QORSHAHA SICIRKA CITY LIGHT: LA SAADAALIN KARO LANA SII WADI KARO

Wararkii ugu dambeyay Qorshaha Istraatijiyada (Strategic Plan) waxuu soo jeediyay in la kordhiyo sicirka lana gaarsiiyo marka leysku celceliyo boqolkiiba 4.3 sannadkii oo la saadaalin karo ilaa 2022 marka kharashka lagu dallaco guriga la daggan yahay gaaro $3.12 halkii bil ama $37.44 halkii sanno.



SEATTLE CITY LIGHT
700 5th Avenue, Suite 3200
P.O. Box 34023
Seattle, WA 98124-4023

seattle.gov/light